



Xeerka Anshaxa



Hordhaca

Haddii aad weydiin laheyd shaqaalahaaga isla shaqeysaan sababta ay u aadan shaqada subixii, waxaad inta badan maqleysaa jawaabo badan oo kala duwan. Qaarkood, tusaale ahaan, waxay dhihi karaan waxay xiiseynayaan in ay yeeshan lacag badan, iyaga oo qaarkood kuu sheegayaan waxay dareemaan inay muhiim tahay in la barto ganacsiga. Laakin waxaa jiro hal sheey aan dhammaanteen ka simmannahay: **waxaan dhammaanteen rabnaa jawi shaqo badbaado iyo raaxo leh.**

Si loo hubiyo in qof walba dareemo raaxo, badbaado oo lagu ogolaaday goobta shaqada, badroonigaaga ayaa hubiyo inay jiraan faa'idooyinka shaqaale wanaagsan, xaaladaha shaqaeynta iyo xiriirada shaqada ee diyaarsan. Warqada waxaa ku jiro, tusaale ahaan, sida aan ula macaamilno miba midka kale ee goobta shaqada. Waxaan sidaas darteed qornay qeyb sharciyo ah oo sharaxayo sida aan u raadino inaan midba midka kale usula dhaqanno ee Dethon.

Waxaan ku tilmaan qaadana sharciyada sida '**Xeerka Anshaxa**'. Tani waxay u egtahay adkaan yar oo rasmi ah, laakin dhabtaa waa **sharciyo aad u toosan**, oo ay ku jiraan 'Salaan shaqaalaha isla shaqeysaan markii aad aragtid iyaga'; 'Iska hubi inaad imaatid shaqada adoo nadiif ah'; iyo 'Haku isticmaalin daroogo ama alkulo goobta shaqada'.

Waa wax wanaagsan in laga dhigo sharciyadaan qoraal ahaan, si markaas qof walba u aqriyo iyaga oo u barto waxa laga filanayo iyaga. Tan dharteed, Xeerka Anshaxa wuxuu u adeegaa sida **xasuusiye** dhammaanteen ah.

Tan iyo intii sharciyada lagu sharaxay Xeerka Anshaxa waa caadi isticmaalka maalin walba, waxaan rabnaa in qof walba u hogaansamo iyaga. Waxaan sidoo kale fileynaa in **shaqaalaha digniin isa siiyaan** markii ay ogaadaan in qof ku xadgudbayo sharciyada. Tani waa sida aan si wadajir ah uga shaqeyno ka aasaasida jawi shaqo wanaagsan oo taageero leh Dethon.

Salaan shaqaalaha isla shaqeysaan markii aad aragtid iyaga
Is ammaanaan midba midka kale
Ixtiraam muuji
Waxaad wax ka baran kartaa dhaleexeenta
Isku day inaad ku hadashid af Daj (haddii aad awoodid)
Iska hubi in wajigaaga iyo indhahaafa aysan daboolneyn



Ixtiraam

Dhammaanteen waan kala duwannahay, iyo qaar ka mid ah shaqaalaha isla shaqeysaan laga yaabo inaysan wadaagin afkaarahaaga. Taasi waa sababta ay muhiim u tahay in midba midkale ixtiraamo. Tani waxay la micna tahay is ogolaanshaha oo ka hadlida xumaanta qofba qofka kale, weerar ama haddii kale dabeecad aan ku habooneyn oo midba midka kale. Waxay sidoo kale la micna tahay inaad marnaba ka reebin ama iska indho tirin qofna.

Salaamida shaqaalaha isla shaqeysaan

Waxay qaadataa dadaal yar, laakin aad ayay muhiim u tahay: **isa salaamida**. Dadka way jecelyihiin in la salaamo, marka marwalba aad gashid qol, iska hubi inaad dhahdid 'subax wanaagsan', 'galab wanaagsan' ama 'maqrib wanaagsan'. Waxay ka dhigtaa dadka inay wanaagsan ku dareemaan inay ogaadaan qaabkaan.

Dhageysiga dadka kale

Waxaad arkeysa inay baashaal tahay in si wanaagsan loo barto shaqaalaha isla shaqeysaan, marka isku day inaad la sheekeysayid qof inta lagu jiro nasiinyadaada. Waxaad jeclaan kartaa inaad u sheetgtid iyaga waxa aad sameysay inta lagu jiray dhammaadka isbuuca. Shaqaalaha aad isla shaqeysaan waxay sidoo kale sameeyaan noocyada waxyaabaha oo waqtigood gaarka ah, oo sidoo kale waxay jeclaan lahaayeen inay wax kaaga sheegaan waaya aragnimadaan. **Waa inaad sidaas darteeda dhageysataa shaqaalaha aad isla shaqeysaan.** Sii iyaga waqtiga ay u baahanyihiin inay dhameeyaan sheekadooda. **Isku day inaad ku hadashid af Daj** haddii aad awoodid, sida midaan ay kugu caawineyso ka fogaanshaha isfaham la'aan walba.

Ammaan bixinta

Aad ayaad ugu shaqeysaa Dethon. Iyo markii aad sameyneysid si wanaagsan, kormeerahaaga guud wuxuu sameynayaa meesha kugu ammaanayo adiga. Si kastaba, waxaad sidoo kale **ammaani kartaa dadka nafsadaada**, tusaale ahaan haddii aad aragtid in shaqaalo isla shaqeysaan sameeyay shaqo wanaagsan. Waxaad ogaaneysaa inaysan wanaagsaneyn kaliya in la helaa ammaan, waxaa sidoo kale wanaagsan in la ammaano dadka kale.

**Qubeyso si joogto ah
Ilkaha Cadeysa
Xiro dhar nadiif ah**



Iska hubi inaad imaatid shaqada adoo nadiif ah

Si joogta ah u dhaqo

Waa muhiim inaad si wanaagsan usu daryeeshid. Tani waxay la micna tahay ma ahan kaliya raacida cuntada caafimaadan, laakin sidoo kale dhaqida si joogto ku saleysan. Urta jirka si daran ayaysan u wanaagsaneyn. Adiga oo laga yaabo inaad ogaan nafsadaada, waa mid aan aad raaxo kuugu laheyn shaqaalaha isla shaqeysaan ee kuu dhow. **Waa inaad sidaas darteeda hubisaa inaad si joogta ah u qubeysatid.**

Cadeysiga Ilkahaaga

Cadeysiga ilkahaaga maalin walba waa muhiim, sida ay labadaba ku hayaan ilkahaaga si caafimaadan oo ku siisaa neefsi cusub.

Waa inaad sidaas darteeda cadeysaa ilkahaaga ugu yaraan labo jeer maalintii:

subixii ka hor inta aadan aadin shaqada, iyo ka hor aadista sariirta habeenkii.

Dhar nadiif ah

Sidoo kale waa muhiim inaad badeshid dharkaaga maalin walba. Haddii aad xiratid isla funaanada maalmo badan ee dhammaadka, waxay qaadaneysaa ur aan wanaagsaneyn, xittaa haddii aad u dhaqidid nafsadaada si ku haboon maalin walba. **Waa inaad sidaas darteeda u badeshaa dharkaaga si joogto ku saleysan, iyo soksantaada iyo kastuumadaada.**

**Si wanaagsan uga taxadir kabahaaga shaqada
Luuqadaada illaali
Ha isticmaalin taleefonkaaga adiga oo taagan aagaga macaamiisha
Ha qeylo badnaanin
Sigaar haku cabin banaanka dhismaha**



Ka qeybgal dabecada saaxibtinmada la ah macaamiisha

Joogtey muuqaal simman oo xirfadeysan

Sida shaqaalaha Dethon waxaad mataleysaa shirkada, taas oo micnaheeda yahay waa inaad joogteysaa muuqaal simman oo xirfadeysan marwalba. Markii ka shaqeyneysid aaga macaamiisha ama booska bulshada ama haddii aad si ku meelgaar ah laguugu xilsaaro shirkad, waa inaad marwalba uga tagtaa aragtid wanaagsan. Tani waxaa ku jiro xirashada marwalba dhar nadiif iyo simman/labiska xirfadlaha.

Dhaqmada wanaagsan

Markii aad ka shaqeyneysid xafiiska Dethon ama meel kale, waa inaad marwalba illaalisaa luuqadaada. Meesha Dethon, ma ogolin isticmaalka luuqad edeb daro ah (erayo xun). Ha sameynin wacitaanada taleefonka adiga oo joogo aaga macaamiisha – waxay u muuqataa mid aan xirfadle aheyn. Waa inaad sidoo kale damisaa raadiyowgaaga inta lagu jiro waqtigaan: tani labadaba waxay u leedahay carqaladeyn yar macaamiisha oo waxay sahlisaa in la wada sheekeysto.

Joogtey qaanuunta badbaadada
Xiro dharka badbaadada
Ku soo wargeli xaalado walboo halis ah kormeerahaaga



Badbaadada goobta shaqada

Xeerarka badbaadada ee isticmaalida mashiinada

Qaar ka mid ah badeecooyinka aan ka soo saarno Dethon waxay ku lugleedahay isticmaalida **mashiinada halista ah**. Waxaa jiro **sharciyada badbaadada** diyaarsan si markaas looga hortago shilalka inay dhacaan. Weydii kormeerahaaga taas oo sharciyada badbaadada ay adiga ku quseeyaan.

Dharka badbaadada

Dethon waxay ka go'antahay ka hortaga shilalka ee goobta shaqada. Si markaas loo bixiyaa goobta shaqada ugu badbaadsan, waxaan u baahannahay sharciyada badbaadada kaliya; waxaan sidoo kale u baahannahay caawintaada. Waa inaad sidaas darteeda soo xasuusisaa shaqaalaha isla shaqeysaan inaysan marnaba ku xiran **dharka badbaadada** sida gacan-gashiyada/ama suufafka dhagaha.

Ka fagow xaaladaha halista ah

Xirashada dharka aadka u dabacsan ama dharka leh qeybaha gooniga ah sida xargaha waxay noqon karaan kuwa halis ka ah goobta shaqada. Waxaad sidoo kale ku talisay inaad ku xiran katiinad dheer ama dhago goobta shaqada. **Dharka dabacsan waxay qabsan karaan mashiinka**. Haddii aad isticmaaleysid daawooyin xoogan(oo midkood heerka gaduudka ama jaalaha), waa inaad ku soo wargelisaa midaan kormeerahaaga ama dhaqtarka shirkada.

Caawin Bixi

La shaqey shaqaalaha isla shaqeysaan Ogolow caawinta dadka kale



Is caawiya

Iskaashi

Kaligeen kama shaqeyno Dethon: waxaan ku bixin karnaa badeeco iyo adeegyo heer sare kaliya **iskaashiga shaqaalaha isla shaqeeya**. Cabirka iyo baaxada badeecooyinka ama adeegyada ma quseeyaan.

Caawi shaqaalaha isla shaqeysaan

Wada shaqeynta sidoo kale waxay la micna tahay caawinta shaqaalaha isla shaqeysaan marka ay u baahanyihiin. Si kastaba, dadka qaarkii waxay dhibaato ku qabaan weydiinta dadka kale caawin. Haddii aad aragtid in qof la dhibaatoonayo sameynta shaqo gaar ah, waxaad weydiin kartaa iyaga haddii aad amaahin kartid gacan.

U ogolow shaqaalaha isla shaqeysaan inuu ku caawiyo

Mararka qaar shaqada lagu xilsaaro sameynteeda aad ayay u adagtahay, oo waxaa lagu weyddiyay inaad sameysid wax aadan dhahbid fahmin. Xaaladahaan, waa inaad is xoreysaa si aad u **weydiisid qof caawis**. Shaqaalaha isla shaqeeyo mararka qaar waxay kormeeraan inaad isticmaali kartid caawin yar. Markii shaqaale isla shaqeysaan **ku siiyo inuu ku caawiyo**, looma baahno inaad ku xanaaqdid iyaga.

Is fahamka midba midka kale

Ma jiro mid inaga naga mid ah oo kaamil ah: qaarkood waxa qabaan curyaannimo ee ka dhigta nolosha mid aad u adag – xaaladaha qaarkood, tani xittaa tallo kuma ahan banaanka. Iyada oo dadka qaarkood ay horay u haystaan waaya aragnimada shaqada qaar marka ay ku soo biiraan shirkadeena, dadka qaarkii ee ka shaqeeya Dethon waa shaqadooda ugu horeysa. Tani waxay la micna tahay inaa dhammaanteen laheyn heerka isku xirfada, oo waa inaan is caawinaa oo aan wada shaqeynaa haddii loo baahdo. Dadka qaarkii waxay dhibaato ku qabaan weydiinta dadka kale caawin. Haddii aad aragtid in qof la dhibaatoonayo shaqo gaar ah, waxaad weydiin kartaa iyaga haddii aad caawin kartid. Waxaan ku joogteyn karnaa jawi shaqo wanaagsan inaan ku degdegin xukunka waxqabadka shaqada shaqaalaha isla shaqeeya.

**Qamriga waa ka mamnuuc goobta shaqada
Daroogada waa ka mamnuuc goobta shaqada
Iska hubi inaad u hogaansanaatid xeerka sigaar cabida Dethon**



Qamriga iyo Daroogada

Haddii aad jeceshahay inaad ugu raaxeysatid cabitaanka qamriga guriga maqribkaa, tan aday kuu taalaa. Laakin waa inaad ogaataa imaanshaha shaqada adiga oo cabsan qamri iyo **ku cabida aalkulo goobta shaqada waa mamnuuc**. Aalkulo cabida waxay saameysaa diirad saaridaada, taas gelisaa halis adiga iyo shaqaalaha isla shaqeysaan.

Isticmaal ama hayshada daroogada waa ka mamnuuc Dethon. Laguuma ogolo inaad imaatid shaqada adiga oo cabsan muqaadaraadka sharci daraad ah, ku isticmaalida daroogada goobta shaqada, ama ahaanshaha booska daroogada. Waxaa lagu soo rogayaa tallaabo edbin haddii aad ku guuldareysatid inaad u hogaansanaatid sharciyadaan.



Xoogsheegsiga

Inaga isuguma xoogsheegano goobta shaqada, sida qof walba leeyahay xaquuqda jawi lagu shaqeeyo ee badbaadada iyo taageero leh. 'Xoogsheegsiga' waxay la micna tahay qof ku kaftamida, adiga oo ku dhibayo ama kugu jeesjeesayo dadka hortooda. Waxaa jiro kala duwanaansho u dhaxeeyo xoogsheegsiga iyo si sahlan u sameynta kaftan. Labadaba xoogsheegsiga iyo xanta waxay aasaasi karaan jawi shaqo sumeysan oo waxay murugo ku sababtaa qofka loo xoogsheegtay. **Xoogsheegsiga shaqaalaha isla shaqeeyo looma dulqaadanayo.**

Dagaalka

Dhammaanteen waan xanaaqnaa mararka qaar, laakin dhammaanteen waxaan ula macaamilnaa qaabab kala duwan. Meesha Dethon, waxaan **diidnay dabeecada dagaalka**, sida aysan waxba xalin. Laguuma ogolol inaad ku dagaalantid, aad haraantisid dadka, ama aad wax ku tuurtid. Waxaa sidoo kale **ku qusuneynayo tallaabo edbin** haddii aad qof ugu yeertid magacyo ama aad u hanjabtid iyaga. Tani sidoo kale waxay quseysaa isticmaalida ama haysashada hubab. Haddii qof ka qeybgalo dabeecad dagaal oo dhinacaaga ah, waa inaad midaan ku soo wargelisaa kormeerahaaga ama la taliyaha. Waxay kadib kugu caawin karaan xalinta dhibaataada.

Takoorida

Inteyna kulli waan kala duwanyahay oo waa gaar: waxaan dhammaanteen u egnahay si ka duwan, oo ay ku jiraan midibka timaheena, indhaha iyo maqaarka. Waxaan sidoo kale xiranaa dhar kala duwan. Dumarka qaar waxay dooran karaan inay xirtaan gambada, tusaale ahaan, iyada oo dadka kale ku baxaan madax banaan. Ragga, sidoo kale, waxay xirtaan noocyo kala duwan ee dharka, oo ay ku jiraan wax walba ka bilow qamiis illaa joog jiinisyo ah. Laakin waxaa jiro hal shey oo dhammaanteen aan ka simmannahay: **waxaan dhammaanteen leenahay xaquuqda loogula dhaqmayo ixtiraam**. Haddii aad qof ula dhaqantid si aan sharaf laheyn, waxaa laguugu soo rogi karaa tallaabo edbin. Haddii adiga nafsadaada aad dareentid in laguugu takoorau oo qaab walba ah, waad ku soo wargelin kartaa midaan kormeerahaaga ama la taliyaha, kaas oo kadib kugu caawin kara xalinta dhibaataada.

Cagajugleynta


Na looma ogolo inaan u cagajugleynta shaqaalaheena isla shaqeeya. Tani waxay la micnatahay waa inaad marnaba ku cadadin qofna wax aysan rabin inay sameeyaan, sida amaahinta lacagtaada.

Galmada

Gurigaaga iyo goobta shaqada waa labo meelo kala duwan. Tani waxay la micna tahay waxaa jiro waxyaabo aad ku sameyn kartid guriga oo aan laga ogolaan karin goobta shaqada. Tani waxaa ku jira ka qeybgalida bandhiga bulshada ee jaceylka (hab siinta iyo shuminta), gacan ku wareejinta agagaarka qof, u dhow qof ama si wareegto ah u taabanayo qof kale. Kuwaan dhammaan waa qaababka dabeecada galmada taas oo aan ka mid aheyn goobta shaqada. Iyada oo aan dhammaanteen ku raaxeysan karno kaftanka agagaarka oo ay la jirto shaqaalaheena isla shaqeyno, kaftanada galmada ama edeb darada marnaba lagama ogola jawiga xifada. Si lamid ah, waa inaad marnaba ku dhibin shaqaalaha isla shaqeysaan luuqada edeb darada ama fuxshiga ama galmada ama haddii kale sawirada aan ku habooneyn ama tilmaamaha. Waa inay cadaataa in sidoo kale aadan u soo dirin qoraalo la jiraan tasmada galmadaa aan ku habooneyn ama sawirada qaawan (fuxshiga ama luuqada aan ku habooneyn) shaqaalaha aad isla shaqeysaan. Fiirinta websaydyada sawirada qaawan sidoo kale lagama ogola goobta shaqada.

Ula dhaqan qof walba si ixtiraam ah
Xoogsheegsiga shaqaalaha isla shaqeeyo looma dulqaadanayo
Dabeecada dagaalka lama ogolo
Galmada kama mid ahan shaqada

Xatooyada iyo burburinta waa ka mamnuuc Ugu isticmaal waqtigaaga shaqada si macquul ah



Ka taxadar

Xatooyada iyo burburinta

Goobta shaqada waxaan isticmaalnaa qalabyada iyo qalabka kale, oo ay ku jiraan miishaarta, kashwiitooyinka, kuulada bacda, warqad, iyo la mid ah. Idiga oo ogaanayo in sheeyadaan mararka qaar sidoo kale ku imaadan gacanta guriga, **laguuma ogolo inaad guriga u qaadatid ama aad ka iibisid dadka kale**, sida midaan loogu tixgeliyay xatooyo. Sidoo kale laguuma ogola inaad burburisid alaabaha shaqaalaha isla sahqeysaan ama aadan guriga u qaadan adiga oo aan weydiin. Ula dhaqan alaabaha shaqaalaha isla shaqeysaan mida shirkada si daryeel leh.

Amaahsashada alaabo

Haddii aad jeclaan laheyd inaad si ku meelgaar ah u maahsatid sheeyada leh Dethon, **waxaa sidoo kale u baahanaysaa inaad weydiisid kormeerahaaga ogolaansho**. Waxaa lagu ogolaanayaa kaliya inaad amaahsatid wax kadib markii ay ogolaanshahooda ku siiyaan. Amaahsashada alaabaha iyada oo aan jirin ogolaanshaha waxay u dhigantaa xatooyo. Iyo amaahsashada alaabaha qof kale sidoo kale dabcan waxay la micna tahay inaad dib u celisid sheyga (sheeyada) kadib markii aad isticmaashid isaga/iyaga.

Saacadaha

Waa inaad ku isticmaashaa saacadahaaga shaqada si daacad ah, maadaama sababta ugu weyn ee aad shaqada u joogtid ay tahay sameynta shaqadaada. Si kastaba, mararka qaar waxaad u baahanaysaa inaad sameysid wax aan shaqada la xiriirin, sida wacida dhaqtarka si aad balan u sameysid. Waxaad leedahay ogolaanshaha lagu sameynayo midaan lagu siiyay adiga weydii kormeerahaaga ogolaansho marka koowaad. Laakin tani waa ka reebid, sida guud ahaan **aan lagu ogoleyn inaad sameysid wacitaanada gaarka ah inta lagu jiro saacadaha shaqada**, sidoo kale iyada oo aan la isticmaaleyn mobeelkaaga gaarka ah. Waa inaad sidaas darteeda damisaa mobeelkaaga gaarka ah inta lagu jiro saacadaha shaqada.

Haddii aad dhabtii xanuunsantahay, waxaan kaa filaneynaa inaad guriga joogtid oo aad u ogolaatid inaad soo kabsatid. Si kastaba, xayawaanka guriga oo xanuunsan, jeexa farta ama madax xanuunka yar ma ahan sababaha la ogolaan karo ee aad ugu yeertid jiro, iyo isla sidaas waa run haddii aad dareemeysid daal oo isbuuc shaqo mashquul ah kadib. Haddii aad sameysid, waxaad hoos u dhigeysaa shaqaalaha isla shaqeysaan. Marka waa inaad marwalba **si taxadar leh u fakartaa ka hor inta aadaan ugu yeerin jiro**.

U hogaansanaanta sharciyada Shirkada waxay usoo digi kartaa booliska



Xadgudubka sharciyada

Haddii aad ku xadgudubtid Xeerka Anshaxa, kormeerahaaga ama shaqaalaha isla shaqeysaan wuu ku tilmaamayaa midaan adiga, iyo waxaa ku quseyn karta tallaabo edbin ah. Tani waxay ka duwanaa kartaa digniinta ah in lagaa ceyrinayo shaqadaada. Nooca ciqaabta aad heshid waxay ku xirantahay nooca xadgudubka iyo haddii lagaaga digay ama aad heshay tallaabo edbin ah ee la soo dhaafay. Noocyada kala duwan ee tallaabada edbinta waxaa lagu sharaxay Heshiiska Wadajirka ah (*Collectieve Arbeidsovereenkomst/CAO*). Xaaladaha qaar, isla markii ayaa lagu edbin karaa. Xaaladaha kale, waa **muhiim in la ogeysiyo booliska**, tusaale ahaan xaalada xatooyada ama weerarka. Xaaladahaan, shirkada waxay marwalba xareysaa wargelinta booliska.

Haddii laguugu edbiyo dhaqankaaga, waxaa laguugu soo ogeysiinayaa warqad rasmi ah. Waad **diidi kartaa tallaabada edbinta** haddii aad ku diido. Nidaamyada kugu haboon waxaa lagu sharaxay warqada aad heshid. Guddi qubaro ah ayaa eegaya dacwadaada oo ka talinayo haddii tallaabo qaadista edbinta ay tahay cadaalad ama aa aheyn iyo damaanad leedahay.

Warbaahinta bulshada: ka fakar ka hor inta aadan dhigin!

Shaki kaa gama jiro inaad garaneysid warbaahinta bulshada. Dad badan ayaa isticmaalo warbaahin bulshada – oo ay ku jiraan Twitter, Facebook iyo WhatsApp – si ay isugu diraan fariimo midba midkale ama usula wadaagaan tusmooyin madadaalo ah. Laakin ma ogtahay inaad dhigi karin kaliya sawiro iyo fiidiyowyo shaqaalaha isla shaqeysaan intarneetka, ama fariimaha ku saabsan Dethon ama shirkada lagu xilsaaray?

Iyada oo aan dhammaanteen xaq u leenahay fikradeena, warbixinta aad wadaagto ee ku saabsan Dethon ama shirkada lagu xilsaaray waxay si suurtoagal ah u noqon kartaa mid dhaawacdo, xittaa haddii aan qaabkaas loogu tallogalin. Waxaad sidoo kale u baahantahay inaad ka xadartid markii aad direysid fariimo, kaftano iyo fiidiyowyo ku saabsan shaqaalaha isla shaqeysaan, sida ay noqon karaan kuwa xanuun ama xadgudub ku ah dadka kale, iyo xaaladaha qaarkood xitta sababta qilaaf. Tani waxay u hogaamineysaa aasaasida jawi shaqo sumeysan. Sidoo kale, waxaad niyada ku haysaa in warbixin walba aad dhigid onleenka in aan si fudud lagu tiri karin.

Waa inaad sidaas darteeda marwalba ka fakartaa ka hor inta aadan ku wadaagin wax warbaahinta bulshada. Ka fogow dhigida fariimaha xun ama waxyeelada leh marwalbaba!

- Kaliya dhig fariimaha aanan u dhaweyn inay dhaawacaan ama ku xadgudbaan qof kale.
- Si taxadar ah uga fakar ka hor inta aadan ku wadaagin warbixin warbaahin bulshada.
- Ha dhigin fariimo walboo xun ama fariimo si suurtoagal ah u dhaawici karto Dethon, shaqaalaha isla shaqeysaan ama macaamiisha kale.
- Weydii ogolaanshaha ka hor inta aadan dhigin sawirada, fiidiyowyo ama fariimaha ku saabsan dadka warbaahinta bulshada ama boggaga kale ee onleenka.
- Ha qeybin warbixin loogu tallogalay kaliya adiga ama shaqaalaha isla shaqeysaan.
- Ha isticmaalin loogada Dethon ogolaansho la'aan.
- Kaliya dhig fariimo magacaaga quseeya; ha isticmaalin naanees ama magac hore.
- Ha dhigin fariimo walboo cadeyn marqaati, xun, xadgudub ama hanjabaad ah, sida ay si suurtoagal ah u dhaawici karaan dadka kale oo u aasaasi karaan jawi shaqo sumeysan.
- La xiriir maamulahaaga haddii isticmaalka warbaahinta bulshada ay kugu sababeeyso murugo goobta shaqada ah ama haddii aad ogaatid in qof si xun u isticmaalayo warbaahinta bulshada.

Ma u baahantahay caawin ama ma qabtaa wax su'aalo ah?

Haddii aad u sharaxdid dhibaataada mid ka mid ah shaqsiyaadka hoos ku qoran, waxay isku dayayaan inay ku caawiyaan sida ugu badan ee suurtoogalka ah.

Waxaad la soo xiriiri kartaa mid ka mid ah dadka xigga:

- Kormeerahaaga
- La taliyahaaga HR
- Dhaqtarka shirkada

Qoraalka ugu dambeeyay

Dethon waxaa ka go'an inay kobciso jawi shaqo u wanaagsan shaqaalaha. Xeerka Anshaxa wuxuu u adeegaa inuu taageero ujeedadaan. Haddii aan dhammaanteen u hogaansanaano sharciyada, waxaan aad ugu dhawaaneynaa inaan gaarno ujeedadeena:

Aasaasida jawi shaqo aad loogu raaxeysto

Xeerka Anshaxa wuxuu sharaxaa sida shaqaalaha Dethon laga filanayo inay ugu sameeyaan nafsadooda goobta shaqada. Dabeecadaan waxay la xiriiirtaa ma ahan kaliya ogaanshaha sida ula dhaqanno shaqaalaha isla shaqeeya, laakin sidoo kale qaabka aan ula dhaqanno macaamiisheena iyo martida. Sida cad, waxaan ka filaneynaa iyaga inay u hogaansamaan Xeerka Anshaxa sidoo kale.

Waxaan rajeyneynaa inaad u sheegeysid mowduucyada Xeerka Anshaxa ee ay la jirto kormeerahaaga, shaqaalaha isla shaqeysaan iyo dadka kale ee ku ag dhow.

Waxaan rajeyneynaa inaad jeceshahay ka shaqeynta Dethon!



Sharaxaadaha daabacaada

Macmiilka

Dethon

Wax soo saarka

Sandra Cornelissen Communicatie
www.sandracornelissen.nl

Naqshada

De Wilde Zeeuw
www.dewildezeeuw.nl

the **Language** lab
translation services

Dethon
Haarmanweg 33
NL-4530 AD Terneuzen, the Netherlands

Taleefonka: +31 (0)115 675 200

www.dethon.nl

Qiirashooyinka

Haeghe Groep
NLW Groep
Pantar
Pauw Bedrijven.
Weener Groep